



Fariintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 11, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Qadada ADA & Dhacdooyin Waxbarasho

Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanku wuu 31 jirsaday. Iyada oo la aqoonsanayo sharcigan muhiimka ah, Guddiga Naafanimada ee Oregon, iyo Xarunta ADA ee Waqooyiga-bari ayaa qabanaya [Qado lacag la'aan ah & Dhacdooyin Waxbarasho](#) maalin kasta oo Talaado ah bisha Luulyo.

ADA waa sharciga xuquuqda madaniga ah oo muhiim ah oo la ansixiyay 1990 oo welina ah ilo muhiim u ah dadka naafada ah ee dhanka helitaanka xuquuq buuxda oo loogu talagalay ka qayb qaadashada bulshada. Waa sharci muhiim u ah dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Afar Qado oo lacag la'aan ah & kulamo Waxbarasho ayaa la bixinayaa, oo ka bilaabmaya duhurka ilaa 1 galabnimo, oo la adeegsanayo kulan dhanka fiidiyowga ah. Faahfaahinta waxaa ka mid ah dad xiise leh oo muhiim ah oo goobta ka hadlaya oo dhawaan la shaacin doono. Booqo [bogga internet-ka ee Guddiga Naafanimada ee Oregon ADA](#) wixii macluumaad ah.

Fadlan isku diiwaan geli mid ama dhammaan

kulamada: <https://www.zoomgov.com/meeting/register/vJIsfu6qpzotH3CyEAc-2enJeGkRLXPJVI>

Mawduucyada waxaa ka mid:

Taariikhda ADA iyo Qaybta 504

Caafimaadka Hab-dhaqanka

Sinnaanshaha: Isku xirnaanta, Dhismaha Bulshada ee Naafanimada iyo

Cadaaladda Naafanimada

Qorsheynta Xaaladda Degdega ah ee Loo wada dhan yahay iyo

Sinnaanshaha Dhanka COVID-19

Kulamadaasi waxaa heli kara dadka naafada ah. Muuqaal Qoraal la Socdo

'Captioning' iyo Turjubaanada Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ayaa la

bixin doonaa. Su'aalaha ku saabsan helitaanka, ama codsiga in wax la sii

qorsheeyo, fadlan la xiriir

contact OregonDisabilities.Commission@dhsosha.state.or.us. Codsiyada

waa in la sameeyaa ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulamada.

Fadlan, la xiriir Oregon.DisabilitiesCommission@dhsosha.state.or.us haddii aad hayso su'aalo ku saabsan dhacdada.